

# Waxaa cusub corona CORONA

SOMALISKA  
NAMBAR 16  
SIBTAMBAR 2020

## Dhalinyaradu waxa ay ka qayb qaadanayaan wacyi galinta iyo faafinta macluumaadka caabuqa karoona.

Mas'uuliyiinta gobolka Kalmar waxa ay doonayaan in ay dhalinyaradu gacan ka gaysato fidinta iyo wacyi galinta dhalinyarada kale xogaha ku saabsan caabuqa karoona fayrus iyo sida uu qofku isaga jiri karayo. Waxa ayna noqon doonaa matalayaasha ama ambaasadoorada karoona.

**Dhalintu waa kuwo ku wanaagsan wax is gaarsiinta. Laakiin kumay wanaagsana iney raacaan sharciga hay'adda caafimaadka.**

Sidaa daraadeed buu gobolka, iyo maamulka degmadu u doonayaan in dhalintu ay aad u bartaan cudurka karoona. Si'ay markooda ugu sii gudbiyaan dhalinta kale. Oo ay noqdaan "ambaasadoorada karoona" waxa ay ka soo dalban karaan iskuuladooda si ay u noqdaan.

Kuwa noqda "ambaasadoorada" waxaa lasiin doonaa maalin waxbarasho ah. Aqoonyahanada gobolka baa siin doona. Waxaa loo sheegi doonaa sida uu qofku iskaga jiri karayo cudurka isaga dadka kalena ooga jiri karayo.

Waxaa kaloo muxaadara ka qeyb geli doona idaacada P4 Kalmar iyo hogaanka gobolka, waxa ay ka hadli doonaan sida uu qofku u heli karayo warbixin hubaal ah.

"ambasador" kasta waxaa loo sameynayaan qof la shaqeeya.

### Warbixinada iskuulada.

Ugu danbeyn 14-ka sibteember waa inay dhalinyaradu iska diiwaan geliyaan noqoshada "ambaasadoorro" dhamaan dugsiyada sare iyo kuwa folkhoogskolada ee gobolka ayaa ka qayb qaadanaya.

50 arbdy baa noqonaya "ambaasadoorada karoona" hawshu waxay socon doontaa xiliga dayrta oo idil. Bisha desember waxaa dhalinta casuumi doona odayga gobolka oona gudoonsiin doona shahaadooyin waxbarasho iyo aqoonsiyo.

### Cudurkkii weli waa jiraa oo faafaya

Faafidda cudurka ee gobolka weli waa ay socotaa, laakiin waa si ka duwan sidii hore. Hay'adda caafimaadku waxa ay leedahay, hadda waa in dad koox ihi markeliya cudurka qaadaan, si qarax ah.

Taasi waxa ay ka dhici kartaa iskuulada, saaxiibada dhexdooda, goobaha shaqada. Markaa in sharciyada markale la adkeeyo bey noqoneysaa.

-Gobolkeena kalmar diyaar baan u nahay hadii "qarax" noocaasi ahi dhaco, sidaa waxaa yiri Ana Norlén oo ah maamulaha u diyaar garowga masiibooyinka.

Dhalinyaradu sida dadka waaweyn bay iyaguna ugu dhex jiraan dadka. Sidaa daraadeed waa in ay iyaguna is ilaaliyaan si'aaney cudurka u fidin. Dhalintu wey qaadikaraan cudurka ayaga oo aan lahayn calaamadiihii cudurka.

"Ambaasadoorada karoona" waxa ay noqon doonaan kuwa muhiim ah, waxaanan

rajeyneynaa in kuwa badani isa soo qori doonaan.

**Warbixinta "**  
**Ambaasadoorada**  
**karoona" Luqadda**  
**swiidhishka ah oo keliya.**



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.  
Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ku cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.



Kalmar kommun